# Su’aalaha ku saabsan Xidhitaanka Dugsiga iyo Su’aalaha ka imanaya shaqaalaha

## Su’aalaha Ku saabsan Xidhitaanka Dugsiga

**Sidee baa loo sameeyaa go’aanada xidhista dugsiyada ama intee in la eg ayey xidhnaan doonaan?**

Sida caadiga ah, go’aanadan waxaa sameeya maamulka dugsiga, iyagoo la tashanaya gobolka iyo waaxaha caafimaad ee dowlada.

**Sidee baa loo sameeyaa go’aanada ku saabsan joojinta waxqabadyada ka baxsan manhajka kahor ama kadib dugsiga? Sidee baa loo joojiyaa ciyaaraha iyo munaasibadaha kale ee kabaxsan dugsiga degmadayda?**

Go’aanadan waxaa sameeyey dugsiyada ay saameeysay kuwaasoo tahay latalin xaga caafimaadka dadweynaha

## Su’aalaha ka imanaya shaqaalaha

**Maxan sameeyaa haddii aan shaqaalaha oggaysiiyo shaqaalaha ama iskaa wax u qabsada oo xanunsanaya?**

Kalkaalisooyinka dugsiga, maamulayaasha, iyo shaqaalaha dugsiga raac Hagaha Cududrada La-is-qaadsiiyo OHA iyo ODE's. Hagayaashan waxay kaa caawin doonaan inaad fahanto habka ugu saxsan ee kahor tagista iyo ka saarida suurto galka ah.

Shaqaaluhu waa inaanay iman shaqada haddii ay haystaan:

- Xumad ah (100.4° F [38° C] ama wax intaa ka sareeya iyadoo la isticmaalayo cabiraha heer kulka caadiga ah) ee 24 saacadood ee lasoo dhaafay
- Calaamadaha xumada
- Calaamado kale ee ugu yaraan 24 kii saac
- Isticmaal- xumad yareeye ama calaamado kale oo bedelaya dawooyinka (tusaale: xakamaynta qufaca)

Shaqaaluhu waa inay usheegaan kormeerahooda waana inay guriga joogaan markay xanuunsanayan CDC waxay kasoo talo bixisay in shaqaaluhu leh calaamadaha xanuun degdeg ah marka la yimaado shaqada ama cida xanuunsata xiliga lagu guda jiro maalinka waa in laga karantiimeeyaa shaqaalaha kale loona diraa guriga sida ugu dhakhsiyaha badan. Adkee joogitaanka guriga markaad xanuunsato, anshaxa

neefsashada, iyo nadaafada gacmaha ee dhamaan shaqaalaha Wixii macluumaada ee intaa dheer eeg

- Akhlaaqda quficida iyo hindhisida.
- Bogga interneetka ee gacmo nadiifinta macluumaad dheeriya.

Astaamaha ugu muhiimsan ee COVID-19 waxay kala yihiin qufac, xumad iyo neefsashadoo gaabata. Dib u eegis ku samee boggaga interneetka ee OHA ama CDC ee liiska calaamadaha taasoo laga yaabo inay la xidhiidhaan COVID19:

- Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA)
- Xarumaha Xakamaynta iyo Ka Hortagga Cudurrada:

**Maxaan sameeyaa haddii aan oggaysiiyo ardaydu inay xanunsatay?**

U dir ardayda dugsiga inay utagaan kalkaalisooyinka. Haddii kalkaalisadu aan la heli karin, la xidhiidh qoyska oo weydii inay geeyaan goob caafimaad isla markaana raacaan hab maamuuska sare ee shaqaalaha iyo iskood wax u qabsada.

**Dakhli ama hage noocee ah ayaa la heli karaa si loola xidhiidho waalidiinta iyo ardayda?**

ODE wuxuu soo diray taakulo isgaadhsiineed saraakiisha dugsiga degmada si ay u ogaysiiyaan una caawiyaan sida ay ula xidhiidhayaan deegaankooda.

Talooyinka lagu caawin karo sida caruurtu ula tacaali lahaayen iyo macluumaad kale oo muhiima ayaa ku diyaara boggagan interneetka

- CDC Waxay ka Caawinayaan Caruurta inay kala Tacaalaan Masiibooyinka
- OHA Macluumaadka COVID-19

OHA Hanuuninta Kahortaga COVID-19

**Sidee dugsiyada ardaydu dhigtaan/shaqaalaha ay u aqoonsan karaan sunta COVID-19?**

Haddii ardayda iyo shaqaalaha dugsigu uu ku dhaco caabuqa COVID-19, nadiifin heer calami ah iyo jeermis-dilayaasha ayaa ah mid loo baahan yahay si loo dilo fayraska.  Qorshe lagu nadiifinayo dugsiga ayaa la samayn karaa iyadoo lala tashanayo caafimaadka dadweynaha ee deegaanka. Halkan waxaa ah liiska jeermis-dilayaasha kuwaasoo la isticmaali karo si loogu dilo fayraska COVID-19.

**Ma waxaan ku suganahay khatar anoo ah xubin shaqaale?**

Fayrasyadu way ku faafi karaan dugsiyada iyo meelaha kale ee dadku iskugu imaadaan, sidaa darted waa muhiim in dadka leh calaamadaha (xumad, qufac, neef-qabatow) inay joogaan guriga; waa midka mida waxyaabaha ugu muhiimsan in lagu yareeyo inuu faafo. Caafimaadka dadweynaha waa masuuliyada qofwaliba saaran. Dadka waaweyn iyo caruurta leh calaamadahan waa inay joogaan guriga lana xidhiidhaan maamulka caafimaadka dadweynaha ee deegaanka ama bixiyaha daryeelka caafimaad, haddii aad ka walaacsan tahay waxaa laga yaabaa inaad leedahay COVID-19 waxaanad qorshaysaa inaad bookhato bixiyaha daryeelkaaga caafimaad, hore usii wac si aad usamaysato qorshe si uukula kulmo adigoon usoo baxayn kuwa kale.

Intaa waxaa dheer, bar ilmahaaga inuu si joogta ah u sameeeyo nadaafad wanaagsan iyadoo lagu cabirayo gacmo maydhista iyadoo lagu maydhayo saabuun iyo biyo ugu yaraan 20 ilbidhiqsi, isticmaalayana alkolada gacmaha ee nadfiisa, iyo daaboolista afka iyo sanka markaad qufacdo ama hindhisto . Waa muhiim inaad ogaato in dadka ugu badan ee  unugul caabuqa COVID-19 ay yihiin kuwa waaweyn iyo dadka habka dhiska difaacoodu liito.

**Ma codsan karaa macluumaad ka imanaya bixiyayaasha kaasoo ah ardayda lagu aqoonsaday COVID-19?**

Waaxda caafimaadka dadweynaha ee deegaankaaga iyo dugsiga degmada ayaa la xidhiidhi doona macluumaadka xasaasigaa kuna saabsan ka dilaacida dugsiga, laakiin ardaydu waxay  si kalsooni leh u ilaalindoonaan sida waafaqsan sharciga gaarka ah ee federalka.

**Waa maxay macluumaadka lay oggolyahay inaan la wadaago haddii qof ka tirsan dugsigayga laga garto?**

Ixtiraam sirta. Hala wadaagin macluumaadka ku saabsan kiisaska taas aan weli lala wadaagin maamulka caafimaadka dadweynaha ee deegaanka ama dugsiga

**Haddii dugsiga la xidho, sidee baanu usamayn karnaa wakhtiga waxbarashada? Ma jiraa hab ama nidaam dhaafitaan ah?**

Oregon wuxuu leeyahay halbeegyada wakhtiga waxbarashada (OAR 581-022-2320). Si kastaba ha ahaate, dugsiga deegaanka ayaa sidoo kale codsi ka dhaafitaan heerarka saacadaha waxdhigista Codsi ka dhaafitaan waa in la sameeyaa iyadoo qoraal ah loona geeyaa ku xigeenka kormeeraha guud ee hagida dadweynaha Codsigu waa inuu cadeeyaa sababta degmadu u raadinayso ka dhaafis iyo macluumaadka kale ee waafaqsan.  ODE ayaa si dhow ula shaqayn doona dugsi kasta ama degmada leh xaalad degdega taasoo sababaysa in la helo dedaalo lagu xakamaynayo faafitaanka xanuunka caabuqa.

Dugsiyada degmooyinka waa inay tix-geliyaan saamaynta ugu muhiimsan ee maqmnaanshaha guulaha caruurta iyo samaynta qorsheyaal taasoo kaliya hubinayn caafimaadka iyo badqabka, laakiin sidoo kale joogtaynta sii wadida barashada ilaa heer macquula.

**Sidee buu xidhitaanka dheeri usaamaynayaa helista daynta iyo qalin-jabinta ardayda dhamaynaysa ?**

Oregon wuxuu leeyahay heerar ah hagayaal diblooma ah (OAR 581-022-2000), taasoo aykamid tahay shuruudaha daynta, cadaymo la xidhiidha barashada shaqada, iyo cadaymo ay ardaydu ku muujinayaan shuruudaha Oregan ee Xirfadaha Aasaasigaa. Helista daynta (OAR 581-022-2025), degmooyinku waxay leeyihiin doorashooyin marka ay go'aaminayaan sida loo abaalmariyo daynta iyadoo ka mid tahay khabiirnimada amaahda.  Dugsi degmo oo kastaa waxay haystaan siyaasadooda hagaya iyo sida ay u amaal mariyaan daynta. Xirfadaha Aasaasigaa ee Oregon(OAR 581-022-2115) ardaydu waa inay tusaan inay akhrin karaan kalana saari karaan qoraalada, qorikaraana si wanaagsan, kuna salayn karaan kala duwanaan shaha xisaabeed. Degmooyinku waxay la shaqayn doonaan ardayda tusaysa habka ay ardaydu doortaan xirfadaha aasaasigaa

**Waxaanu haysanaa arday kuwaasoo dhawaan kasoo laabtay fasaxyo dibadaha ah oo lagana yaabo in fayraska Corono laga helayo. Miyaanu umalaynaa in OHA ogyahay cida safartay? Miyey tahay in dugsiyadu la xidhiidhaan maamulka caafimaad ee deegaanka, lala taliyona qoysaska, IWM?**

Wakaaladaha caafimaadka dadweynaha ayaa hadda kaliya la oggaysiiyey safarada kasoo laabanaya wadanka China. Ma weydiinayno dugsiyada inay kasoo "warbixiyaan" safarada soo laabtay una gudbiyaan caafimaadka dadweynaha Dugsigu wuxuu bixin karaa macluumaadka lagala xidhiidhi karo LPHA ee qoyska haddii qoysku uu doonayo inuu oggaado.